



## Booqo Xarunta Bulshada ee Waqooyiga (North) Richmond

Xarunta Bulshada ee North Richmond waa goob bulsho oo dadka lagu soo dhaweeeyo oo laga heli karo taageero wax ku ool ah, macluumaad iyo xiriir loogu talagalay dadka degan North Richmond Estate, oo ay ku jiraan dadka dhowaan u soo guuray guryaha dadweynaha ama bulshada.

Xaruntu waxay bixisaa caawimaad leh adeeg ku hagaya, adeegyada dawladda, taageerada caafimaadka iyo badqabka, xiriirka bulshada iyo in bulshada wax lala qeybsado. Dadka meesha degan waxay shaqaalaha Xarunta ka heli karaan taageero gaar ah, iyo sidoo kale barnaamijyo iyo howlo kala duwan oo lacag la'aan ah kuwaas oo la heli karo isbuuca oo dhan.

Xarakaadyada imaan doona waxaa ka mid ah Xarunta Caafimaadka ee Bulshada, fasalo lagu barto luuqada Ingiriisiga oo uu qof walba heli karo, Adeegga Nabadda ee Xarunta Caddaaladda ee Xaafadda, Kooxda Socodka Ragga, fasallada Zumba iyo Barnaamijkeena Gargaarka Cuntada Bulshada.

Hay'adaha bixiya adeegyada maxalliga ah sida Services Australia, Adeegga Sharciga ee Fitzroy iyo ururada kale ee bulshada ayaa si joogto ah u booqda Xarunta si ay u bixiyaan macluumaad iyo taageero.

Nagu soo booqo Xarunta oo ku taal **110 Elizabeth Street, North Richmond, xilli kasta inta u dhexeysa 10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha.**

Dhammaan dadka oo dhan waa la soo dhoweynayaa.

## Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga



Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



[homes.vic.gov.au/richmond-precinct](https://homes.vic.gov.au/richmond-precinct)



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**

**h v** homes victoria

**BIG HOUSING BUILD**

## North Richmond

Wixii ku soo kordhay bulshada



### Meelo baskiilada la dhigto oo ka amni fiican meelihii hore oo loogu talagalay dadka Richmond degan

Meelo cusub oo baskiilada la surto ayaa hada laga sameeyay kuwaas oo loogu talagalay dadka degan saraha dhaadheer ee Richmond ku yaal.

### Waxaa bilaaban doonta shaqooyinkii marxaladda xigta ee lagu dayactirayo Richmond

Deyr/silig ayaa goobta lagu wareejin doonaa si loo sugo dadka ammaankooda marka aan bilowno marxaladda cusub ee lagu dayactirayo North Richmond.

### Howlihii dayactirka ee laga waday Vere Street hada waa la dhameeyay

Goobaha cusub ee iskuulka ee dadka lagu dejin karo lagana qaadi karo ayaa furan.

# Wixii ka dhacaya Richmond

Juun 2026

## 139 Highett Street

### Howlaha shaqo

- Xoogaa yar oo tusaalayaal (samples) ah ayaa laga soo qaadi doonaa guryaha la faarujiyay gudahooda iyo sidoo kale darbiyada banaanka ah
- Albaabo amni ayaa lagu rakibi doonaa dabaq kasta ee la faarujiyay

### Meelo ammaan ah oo uu iskuulku leeyahay oo dadka lagu dejin karo/ lagana qaadi karo

Goobta cusub ee Vere Street hadda waa ay furan tahay.

Dayactirka la sameeyay waxaa qeyb ka ah meelo ay dadka lugeynaya ka goyn karaan wadada oo la balaariyay, baarkin fiican oo baabuurta la dhigto iyo iftiin fiican, iyo sidoo kale kuraas lagu fariisto, dhul lagu qurxiyay dhir iyo meel baskiilada la dhigto.

## 106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street

### Dib u dhiska mustaqbalka

### Rakibidda Mukeyfyada/ qaboojiyeyaalka

### Meelo baskiilada la surto

- Meelo cusub oo baskiilada la suran karo ayaa waxaa lagu rakibay dhulka hoose ee dhisme kasta. La soco wixii macluumaad dheeraad ah ee soo kordha ee ku saabsan sida loo gali heli/geli karo.

## Church Street, Elizabeth Street, Anderson iyo meesha kor loogu socdo ee Williams Court

### Howlaha shaqo

Laga bilaabo dabayaaqada bisha Juun waxaad arki doontaa shaqo badan oo meesha laga wado si aan isugu diyaarino inaan bilowno marxaladda xigta ee dib-u-dhiska taas oona lagu jajabin doono meelaha kor loogu socdo ee la baneeyay.

- Goobtana deyr ayaa lagu wareejin doonaa si dadka looga ilaaliyo
- Laynka xafiiska boostada ayaa la xiri doonaa. Victoria Street waxaa laga soo geli karaa oo keliya Lennox Street
- Meelo ay isticmaali doonaan shaqaalaha ayaa goobta laga hirgelin doonaa
- Waxaa kordhi doonta tirada gawaarida ee ka qeybqaadaneysa howlaha wax-dhisida
- Mararka qaar waxaa laga yaabaa in la badelo meelaha ay dadka lugeynaya kasoo geli karaan Elizabeth Street, fadlan raac calaamadaha oo isticmaal meelaha loo iclaamiyay inay dadka lugeynaya wadada ka gooyaan
- Baarkinka baabuurta ee ku yaal Anderson iyo Williams courts waa la xiri doonaa

## Taageerada loogu talagalay dadka guuraya ee degaya guryaha cusub

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo  
Isniinta ilaa Jimcaha  
Waqooyiga Richmond  
Xarunta Bulshada  
110 Elizabeth Street

## Agagaarka xaafada

### Amniga xaafadda oo dhan

- Dadka degan dhamaan dhismeyaalkana waxaa loo sameyn doonaa fureyaal/kaarar lagu geli karo goobta. *Kala soco waraaqaha darbiyada lagu dhajiyay wixii macluumaad dheeraad ah*

### Garoonka kubadda kolayga oo la casriyeynayo

- Waxaa socota sidii looga dhigi karaa meel fiican oo lagu tartami karo



## 5 Lewis Court iyo 161 Elizabeth Street

144 guryo bulsho/dowlad oo cusub iyo goobo bulsho

### Ayaa la dhameystiray sanadkii 2025 - kireysteyaasha ayaa ku guray



- Meel ammaan ah oo ay dadka lugeynaya wadada ka goyn karaan
- Meesha loogu talagalay dadka lugeynaya inay isticmaalaan
- Dadka lugeynaya ma isticmaali karaan
- Baarkinka baabuurta la dhigto waa uu xiran yahay



## Inaysan wax dhibaato ah kaa soo gaarin meelaha ay shaqadu ka socoto ee xaafadda

Waxaan si joogto ah ula soconaa waxyaabaha ay ka mid yihiin shanqarta, boodhka iyo gariirka si wax kasta amaan u ahaadaan.

### Ku wareega agagaaraha

- Marwalba inta aanan shaqada la bilaabin ka hor waxaa meesha lagu wareejin doonaa deyr
- Waan kuu sheegi doonaa goorta iyo goobaha aad ka filan karto baabuurta waaweyn ee xamuulka
- Marwalba raac calaamadaha si aad wadooyinka goobta ugu dhex socoto
- Raac tilmaamaha shaqaalaha baabuurta haga markay halkaas ku sugan yihiin si ay kuu caawiyaan

### Si nabdoon in loo maareeyo alaabaha

- Nidaam amni oo adag ayaa marwalba jiri doona marka meesha laga saarayo lana nadiifinayo waxyaabaha khatarta keeni kara
- Calaamado wax sharaxaya ayaa marwalba goobta la dhigi doona si aad uga fogaato meelaha ay yaalaan waxyaabaha khatarta leh.
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto shaqaalo xiran dhar jirka difaacaya

### In la helo meelo laga geli karo

- Meelo ay ka geli karaan adeegyada gurmada degdega ah ayaa marwalba jiri doona
- Meelo laga geli karo baarkinada baabuurta la dhigto, oo ay ku jiraan baarkinka naafada, ayaa la heli doonaa
- Wadooyinka ku meelgaarka ah waxaa loo sameyn doonaa nalal iftiimiya

- Shaqada aan qabano waxaa hagta saacadaha caadiyan la shaqeeyo ee u degan Golahaaga:
 

<b>Isniin ilaa Jimce</b> inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo	<b>Maalmaha sabtida</b> 9-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo
--	--

- Mararka qaarkood waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha golaha deegaanka (council permit) si loo shaqeeyo wixii ka baxsan saacadahaas balse waan lasoo socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

- Wixii shaqo ah oo dhan waxaa loo qabtaa si waafaqsan heerarka ugu sarreeya ee amniga iyo shuruudaha sharciga.

Dadka deegaanka ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xiriiraan xafiiska guryaha ee deegaanka:

1300 598 521

richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: [homes.vic.gov.au/information-in-your-language](https://homes.vic.gov.au/information-in-your-language)



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au